Ku soo dhowow Halkan guji si aad u gasho bogga

Boggan wuxuu bixiyaa warbixino muhiim oo ku saabsan carruurta iyo dadka da'da yar ee magangelyo doonka ama qaxootiga ah ee ku nool Iskootland. Waxaa kale oo aad boggan ka heleysaa warbixinno dhinaca sharciyada ah oo ku saabsan qareenada iyo dadka kaala talinaya dhinacyada sharciga oo ay waaliddiintu u baahan karaan.

Boggan wuxuu u qeybsan yahay seddex qeybood-

Dadka da'da yar-su'aalo iyo jawaabo

Qoyska-Su'aalo iyo jawaabo

Dhanka sharciga iyo qeybaha takhasusiinta

Qeybta waaliddiinta waxaa lagu turjumey luqado kala duwan.

Waxaa jirta qeyb aad wax kaga baaran karto wixii war bixin oo Ingiriisi ah seddexda qeybood.

Inkastoo la isku dayey in la hubiyo in waxaa ku qoran boggan ay noqdaan wax sax ah haddana waxaa loogu talo galay uun warbixin guud uun. Ma aha warbixinadan warbixino dhanka sharciga ee buuxa ah ama talo bixin sharciyadeed, sidaa darteedna looma isticmaali karo labadaas midkoodna. Haddii aad u baahan tahay la talin gaar ah oo dhanka sharciga ah waxaa kugu wanaagsan inaad doonato qareen ama hey'ad kale oo sharciyeed.

Qoyska

1. Maxaan sameyn karaa haddii gabadheyda/wiilkeyga uu dhib ka heysto dhinaca degista ama la qabsashada waddanka?

Ku noolaanshaha waddan kugu cusub, gaar ahaan weliba mar aad soo martey dhibaatooyin badan intaadan soo gaarin waddanka waa arin ay ku dhibtoodaan qoysaska. Waxaa hoos kuugu qoran qaar ka mid ah waxyaabaha adiga ama canugaaga la gudboon inaad sameysaan:
- Waxaad la hadli kartaa qof ka mid ah bareyaasha iskuulka sida kuwa qaabilsan ardada toosintooda iyo wax u sheegooda.
- Waxaad fikrad ahaan u dhiiban kartaa in ay lagu mashquuliyo waxyaabo ay ka mid yihiin hawlo yar yar sida sboortiga oo ay waqtiga ku buuxiyaan.
- Waxay carruurta ka xaadiri karaan dhacdooyinka diimeed ama dhaqameed ee umadda ay ka soo jeedaan ay ku qabtaan goobaha jaaliyaddooda ama umadaha ay isku waddanka ka soo jedaan.
- Waxaad teleefoon aan lacag aheyn u diri kartaa hey'ad lagu magacaabo Childline nambarka 0800 1111 oo aad kala xaajoon kartaa waxa ilmahaaga dhibaya.
- Waxaad u geyn kartaa Dhaqtarka. Dhaqtarka wuxuu u diri karaa qolo kale ee takhasus u leh oo dhegeysan doona dabadeedna caawin doona. Sida dhaqtarka cilmi nafsiga.

---

2. Booliska ayaa waxaa ay joojiyeen wiil/gabar aan dhalay. Maxaa ku dhici doona, maxaanse anigu sameyn karaa?

Booliiska way joojin karaan wiilkaaga/gabadhaada , waxay weydiin karaan magaciisa/magaceeda iyo cinwaanka gurigiisa/gurigeeda.Boliiska waxaa kaloo ay u kaxeyn karaan wiilkaaga/gabadhaada saldhiga waxayna halkaa ku weydiin karaan su'aalo ilaa iyo muddo ku siman 6 saacadood haddii ay ka shakiyaan in qofkasi uu danbi faraha kula jiro ama denbiba uu soo galey oo ciqaabtiisu ay noqon karto xarig. Haddii wiilkaaga/gabadhaada da'deeda ay thay mid ka yar 16 waxaa qasab ah in lagu soo ogeysiiyo in la xirey, waxaa lagaa dalban doonaa inaad ka soo xaadirto saldhiga booliiska. Inta badan oo aan laakiinse goorwalba aheyn waxaa laguu ogolaan doonaa inaad aragto wiilkaada/gabadhaada.
Lixda saacadood ee ugu horeysa booliiska waxay sharci u leeyihiin in ay sawir, faro, iyo dheecaan DNA (oo laga qaado afka) ka qaadaan wiilkaaga/gbadhaada iyo weliba in ay baaritaan (fatish) ku sameeyaan jirkiisa/jirkeeda. Haadii qofka la baarayo uu yahay gabar waxaa baari doonta gabar booliis ah.
Waxaad waalid ahaan xaq u leedahay inuu qareen talo siiyo wiilkaga/gabadhaada, waxaad kaloo xaq u leedahay lacagta ummadda (Public Fund) oo lagaaga bixiyo kirada qareenka iyo inta in yar oo uu idin difaaco. Qasab ma aha qareenkaasu inuu ahaado isla qareenka arimaha megengalyo doonkiina gacanta ku haya., waxaa jira qareeno iyaga ku takhasusay arimaha booliska iyo denbiyada. Qareenka waxaa loo sheegi kraa in lala socodsiin karaa arinta sida ugu dhaqsiyaha badan ama isla marka qof la xiro laakiin booliisku qasab kuma aha inay qareenka u ogolaadaan inuu arko qofka xiran saacadaha ugu horeeya ee 6-da ah. Marka ay dhamaadaan saacadaha 6-da ah wiilkaaga/gabadhaada waa in la sii daayaa ama si toos ah loo xiraa lana dacweeyaa. Haddii wiilkaaga/gabadhaada si rasmi ah loo xiro waxaa aad u wanaagsan in uu goobjoog ahaado qareen

marka su'aalaha la weydiinayo.
Fadlan waxaad xusuusnaataa in haddii wiilkaaga/gabadhaada uu boolisku xiro oo dacwana ku soo oogaan in taa micnaheedu aysan ahayn in uu wiilkaaga/gabadhaada danbiile yahay/tahay. Wiilkaaga/gabadhaada wax danbi ah ma gelin oo denbiile ma aha ilaa lagu cadeeyo denbi. Dacweynta ka dib qareenkaaga ayaa kuu sharxi doona waxa dhici doona, laakiin marka laga reebo kiisaska aadka qatarta u ah, inta badan caruurta waxaa la saari doonaa maxkamadaha carruurta (eeg see www.childrens-hearings.co.uk/infofamilies.asp). Haddii waalidka iyo wiilka/gabadha ay isku racaan in denbiga uu galay/gashey ama lagu caddeeyaba kiiska lagu soo oogey, waxaa dhici karta in qof u shaqeeya Social-ka uu soo booqdo guriga uu warbixinna ka qoro wiilkaaga/gabadhaada noloshiisa/nolosheeda guriga.

Haddii arintu ay ku biyo shubato maxkamad, wiilkaaga/gabadhaada waxay u badan tahay in caawin dhinaca sharciga ay helaan oo laga bixiyo qareenkii ku mateli lahaa maxkamadda. Haddii wiilkaaga/gabadhaada lagu helo ama isaga/iyada ay qirtaan denbiga arintani waxay wax u dhimi kartaa arinta magangelyo doonkaaga/kiina. Sidaa darteed aad bey muhiim u tahay in talo aad ka heshaan qareenka intaan maxkamadda waqtigeeda (balanta maxkamadda) la gaarin haddiiba suurto gal ay tahay.
Haddii ay kula noqoto in booliiska uu carruurtaada si aan caddaalad aheyn ula dhaqmey waxaad cabashadaada u gudbin kartaa qofka heysta booliiska (Chief Constable) ama sarkaalka u madaxa ah saldhiga xaafaddaada. Isku day inaad hesho magaca booliska aad ka cabaneyso iyo nambarkiisaba. Haddaadan rabin inaad si toos ah ula hadasho booliska waxaad la hadli kartaa qareen ama hey'aqd kaleba oo iyaga hawshaas kuu qabanaya.

Hadii arinko maxkamad tagto, inankaaga/inantaada waxa uu xaq u yeelanayaa ama u yeelanaysaa in sharci yaqaan uu taageero si arimaha isaga ama iyada usiiyo xagga maxkamada.

Hadii inankaaga/inantaada lagu helo dambi ama waxyaala sharciga ka horimanaya tan waxay waxyeeaynaysaa qaxootinimadiina. Marka waxaa muhiina ah in lala tashado qareen ka inta aan la aadin maxkamada hadii suurto gal tahay.

Hadaad umalaynayso in booliska uu handadaad kusameeyay inankaaga/inanthada si xaq daro ah waxa ku dacwayn kartaa madaxa xafiiska booliska ama sarkaalka saldhiga booliisk ku shaqada leh.

Isku day in aad hesho magaca ama lambarka ninka booliska ah. Hadii aadan rabin inaad si toos ah ula hadasho booliska waxaad la hadli kartaa qareenka ama laamaha ku shaqada leh si ay kuu matalaan.

Ogow i Arimahani waa sharci caadi ah sikastaba ha ahaatee sharciyo cusub uu kusaabsan arimaha argagixisada ayaa iman dodna ku waas oo laga yaabo in qodobo ka dukian lahaadaan. La hadal qareen kaaga arimahan hadaad u banhato.

3. Waxaa la ii sheegey in kaalmada ay na siiso NASS la inaga joojin doono ayadoo sababta ay tahay anigoo jebiyey mid ka mid ah shuruucdooda. Sidee ban ugu heli karaa cunto iyo mel aan ku hoyanno qoyska?

Waxaa dhici kartaba in NASS qudheedu ay qalad sameysey. NASS caawinadeeda in la jaro ma aha haddii aad heysato carruur oo aad adiga mas'uul ka tahay gurigana kula jooga. Waxaa muhiim ah inaad sida deg degta badan u hesho talo iyo caawinaadba.

- Golaha qaxootiga ee Scotland (The Scottish Refugee Council) ayaa waxay suurto gal u tahay in ay talo iyo caawimaadba ku siiyaan, wuxuu xafiiskooda ku yaalaa 5 Cadogan Square, Glasgow G2 7PH ama teleefonka 0800 085 6087. Waxay kaloo ay xafiis ku leeyihin Edinburgh wuxuuna ku yaalaa Citizens Advice Bureau, 58 Dundas Street.

- Qof ku takhasusay dhinaca sharciyada magan galyo doonka ayaa ku caawin doona.

- Waxaad la xiriiri kartaa shaqaalaha soshaalka xafiis xaafadeedka (local Council Social Work Services). Waxaad eegtaa bogga internetka www.cosla.gov.uk markaad gujiso waxaa kuu soo bixi doona dhamaan koonsilada Scotland. Xafiiska Glasgow Social Work Services waxaad la soo xiriiri kartaa saacadaha xafiiska uu furan yahay teleefonka ah **0141 287 2000** iyga ayaa kuu sheegi doonna halka xafiiska ugu dhow uu ku yalo. Sosahl-ka aaa waxaa laga yaabaa in ay ku caawiyaan haddii aad heysato caruur. Qeybta sharciyada ayaa waxay kuu sharxi doonaan kaalintooda.

- Hey'adda kale ee lagu magacaabo (Positive Action in Housing) waxay u heystaa qoondeyn lacag ah ay ku caawiso dadka lacagtooda laga joojiyey, telefoonka waa **0141 353 2220**. Waxay kaloo bixiyaan dhar iyo alaabta guryaha lagu isticmaalo cinwaankoodana waa 5 Old Dumbarton Road, Glasgow, wuxuu furna yahay xafiiskooda laga bilaabo 10 am – 4pm, Isniin-Jimco.

4. Waxaa fursad la ii siiyey inaan aado kulliyad lagu barto luqadda ingiriisiga isbuuciiba laba jeer oo fiidkii ah. Carruurta ma uga tegi karaa midka/midda u roon ee jira/jirta 14 jir?

Jawaab sahlan ee ku aaddan su'aashan ma jirto ee ah in looga tegi karo carruur qof aan gaarin 16 sanno si uu xanaaneeyo walaalihiisa/walaalaheeda haddii ay mas'uul yahay/tahay. Si kastaba ha ahaatee haddii ay dhibaato dhacdo intaad guriga ka maqan tahay waxaa laguu qaadan karaa inaad tahay qof aan taxadir laheyn taas waxay keeni kartaa in ay baaritaan kugu sameeyaan boliiska ama qolada sooshalka.
Erayaasha ay ka midka yihiin 'Child minding' ama 'babysitting' oo micnaheedu yahay (ilma heynta) waxaa loo isticmaali karaa wiilkaada/gabadhaada markey gaaraan 16 sanno.

5. Miyaan shaqo u aadi karaa meel ka baxsan Glasgow iyadoo qoyskeygana ay joogaan guriga mar haddii aan heysto sharciga waddanka aan ku joogi lahaa?

Haa waad u aadi kartaa shaqo meel ka baxsan Glasgow iyadoo reerkaaga ay joogaan guriga haddiiba aad heysato sharciga qaxootinimada, (Indefinite Leave to Remain, Exceptional or Discretionary Leave to Remain or Humanitarian Protection).

6. Waxaan rabaa inaan keeno reerkeyga inta ka maqan waddankan UK oo ay ila degaan-sidee baan dal ku gal (visa) ugu heli karaa?

Waa macquul inaad dal ku gal u hesho reerkaaga kuu soo dhow, sida, carruurta kugu tiirsan oo da'doodu ka yar tahay 18, naagtaada ama ninkaaga. Golaha Qaxootiga ee Iskootland (The Scottish Refugee Council) waxaa u jooga shaqaale takhasus u leh oo kaa caawin kara inaad dal ku gal u dalabto cinwaankoodana waa 5 Cadogan Square, 170 Blythswood Court, Glasgow G2 7PH, telefoonkana waa 0800 085 6087. Waxaa kale oo ay xafiis ku leeyihiin Edinburgh oo laga helo Citizens Advice Bureau, 58 Dundas Street. Qof yaqaana sharciyada soo guuridda iyo magan galyo doonka ayaa kaa caawin kari doono fahamsiinta shuruucda iyo waddooyinka loo maro helidda dal ku galka. Waxaa hoos ku qoran in yar oo shuruucdaas ka mid ah oo ku xiran hadba sharciga aad heysato.

Qaxooti – Haddii aad haysato sharciga qaxootinimada waxaad xaq u leedahay inaad dalbato qoyskaaga inta ka maqan sida xaaskaaga nin/naag iyo carruurta da'dooda ay ka yar tahay 18. Waxaa talo wanaagsan ah inaad la xirriirto qareen kaa cawiya arintan. Qoyskaaga waxay u baahnaan donaan in ay iska xaadiriyaan safaaradda ugu dhow ee UK halkaasna ay dalab ka sameeyaan. KA baar xafiiska barwaaqo sooranka dibadda (Foreign Commonwealth Office) si aad u hesho waddanka aad ka dalban karto dal ku galka www.ukvisasgov.uk. Safaaradda waxaa ay ku weydiisan doontaa sharcigaaga qaxootinimo iyo waxyaabo caddeynaya xiriirka qoys ee idinka dhexeeya sida warqadda guurka ama warqad dhalasho amaba tijaabo DNA haddii lagaa waayo waraaqahaas.

Lacag ma aha dalabka dal ku galka qoyskaaga (visa) ay ku soo gelayaan UK, mar haddii ay waddanka soo galaan waxay yeelan doonaan xuquuqda aad adiga laftigaad ku leedhay waddanka. UNHCR waxay bixisaa tikidka diyaaradda, laakiin muddo dheer bay qaadan kartaa inta la sugayo. Laanqeyrta Cas ee Biritishka yaa xitaa ku caawin karta haddii aad heystao qof sharci ahaan ku metalaya.

Indefinite Leave to Remain (Joogitaanka Ilaa Muddo Aan La Cayimin)- Waxaad u u dalbi kartaa qoyskaaga kuugu dhow (Carruur iyo xaas) dal ku gal, haddii aad u caddeyn karto wasaaradda arimaha gudaha inaad awooddo dejintooda dhaqaale ahaanna aad qaabili karto intey UK joogaan.

Exceptional or Discretionary Leave to Remain (Joogitaan Shuruud Ku xiran ama Cayiman)- Xaq sax ah uma lihid inaad keento reerkaaga. Waxaa suurto gal ah in lagaa ogolaado marka la eego duruufo gaar ah laakiin weli aad bey u adag tahay arintaasi marka waxaa kuu roon bal inaad hesho talo qareen. Waxaad u baahnaan doontaa inaad caddeyso inaad awoodi karto xanaaneynta qoyska aad keeni doonto.

Magan galyo doonayaasha aan sharciga helin (Asylum seekers)– Laguuma ogola inaad u dalabto dal ku gal reerkaaga.

7. Waxaan jeclaan lahaa inaan hooyadey keeno UK waayo wey sii duqoowdey Aabbena mar hore ayuu dhintey. Maxaan sameeyaa?

Keliya dadka heysta sharci qaxootinimo iyo Joogitaan aan la cayimin (Indefinite Leave to Remain) ayaa dalban kara in waalidiintooda waayeelka ah loo keeno UK. Waxaa jira shuruuc gaar ah oo loo baahan yahay inaad ka gudubto.

Refugees (Qaxootiga)- Waad dalban kartaa waalidkaaga haddii markii horeba ay ka mid ahaayeen reerkaaga inta aad ka soo tegin waddankaaga oo aysan jirinna cid ku walwaaleysa waddanka ay joogaan. Arintan waxaa u xeer ah xeerka aan ku soo qeexnay su'aasha lixaad jawaabteeda ee qaxootiga.

Indefinite Leave to Remain (Joogitaan Aan La Cayimin) – Waad dalban kartaa waalidkaaga in laguu keeno UK haddii ay da'dooda kor u dhaaftey 65 sanno oo dhaqaale ahaanna si buuxda ama qeyb ahaan ay adiga kugu tiirsan yihiin (oo aad adiga ku biileysey meeshey joogeen) aysan halkaana u joogin dad kale oo ka tirsan reerka oo ku xanneyn kara waddanka ay joogaan. Waxaa kale oo lagaaga baahan yahay inaad caddeyso inaad awooddo dejintooda (Guri) iyo dhaqaalahoodaba (Cuntadooda) ayagoo aan ku tiirsan dhaqaalaha dowladda (Ceyrta). Waxaa jira shuruuc gaar ah haddii aad rabto naag/nin kugu mehersan, carruurtaada 18 ka weyn ama ilmo aad korsaneyso (adoption) inaad keento UK. Qareenkaaga ama Golaha Qaxootiga Iskootland (Scottish Refugee Council) ayaa ku caawin doona telefoonka waa 0800 085 6087.

8. Haddii dhibaato ay nagu hayaan dadka nagula nool guriga ama deriskeenaba ah maxaan sameynaa?

Haddii dadka guryaha deggan ay dhibaato kugu hayaan waxaad isku daydaa inaad qorto waqtiyada iyo taariikhaha ay dhibaatooyinku dhacaan, iyo dhibaatooyinku waxa ay yihiin si ay caddeymo kuugu noqdaan. Waxaa jira dad badan oo kala hadli karto arimaha kaanna caawin doona.

- Waxaad la hadli kartaa qofka maamula guryha sida (Council/Housing Association) ama (local Council-ka) ama waxaad teleefoon u diri kartaa qeybta lagu magacaabo (in Glasgow -Community Relations department) oo uu telefoonkoodu yahay 0141 287 6892 kuwaasoo baaritaan sameyn doonaa dabdeedna go'aan gaari doona.
- Waxaa kale oo aad u sheegi kartaa booliska oo aad telefoon u diri karto ama aad qof ahaanba ugu tegi karto saldhiga kuugu dhow ee xaafadda, ama waxaad telefoon u diri kartaa qolada lagu magacabo denbi joojiyaasha (Crimestoppers) telefoonkooda waa 0800 555 111.
- Haddii dhib laguu gaarsiinayo arimo isirka la xiriira dartood waxaad u sheegi kartaa booliiska ama waxaad dooran kartaa in hey'ad kale ay booliiska kuugu gudbiso. Arintan waxaa lagu magacaabaa Warbixinta qof seddexaad "third party reporting"waxaad bogga www.asyluminglasgow.com ka heli kartaa liis kuu sheegaya inta hey'adood ee howshaas qaban karta ka fiir halka ay ku qoran tahay "How to Report a Crime" haddii kale waxaad u diri kartaa teleefoonka 0800 027 6545.
- Hey'addaha (Positive Action in Housing(0141 353 2220) ama Ethnic Minority Law Centre (Dadica laga tiro bodan yahay) (0141 204 2888) waa hey'ado talo kugu caawin kara.

9. Carruurta markey joogaan darjiinooyinka lagu nasto (play-park) waa lagu qeyliyaa midabka jirkooda dartiisa. Maxaan sameeyaa?

Waxaa jira dad fara badan oo arimahan lagala hadli karo. Waa kan liiskooda.

- Waxaad telefoon u diri kartaa boliiska ama aad ugu tegi kartaa saldhigooda.

- Waxaa kale oo aad telefon u diri kartaa qolada denbijoojiyaasha (Crimestoppers on 0800 555 111).

- Waxaa kale oo jira hey'ado kale oo warbixinta u gudbin kara booliiska ('third party reporting'. Waxaad bogga www.asyluminglasgow.com ka heli kartaa liis kuu sheegaya inta hey'adood ee howshaas qaban karta ka fiir halka ay ku qoran tahay "How to Report a Crime" haddii kale waxaad u diri kartaa teleefoonka 0800 027 6545.

- Waxaad u dacwoon kartaa koonsilka xaafaddaada. Glasgow arintan waxaa wax ka qabta qolada lagu magacaabo Community Relations Department telefoonkoodu waa 0141 287 6874.

- Waxaad la xiriiri kartaa Ethnic Minority Law Centre telefoonkooda waa 0141 204 2888.

10. Carruurteyda ma ka baajin karaa iskuulka si ay howsha guriga iiga caawiyaan ama aan islula aadno balan dhaqtar ama qareen?

-Sharcigu wuxuu leeyahay in waaliddiintu ay mas'uuliad ka saaran tahay in ay hubiyaan in carruurtooda wax bartaan. Haddii ay dhigtaan iskuul waxaa jira qawaaniin ay iskuuladu sameystaan oo haddii aad rabto gabadhaada/wiilkaaga inuu maqnaato/maqnaado adigoo heysta sabab macquul ah inaad ogeysiiso iskuula adigoo qoraal ahaan ugu gudbinaya.

- Carruurtaada waa weydiisan kartaa in ay kuu raacaan wareysiyada dhaqtarka ama qareenada laakiin waxaa ka wanaagsan inuu turjumaan qaangaar ah uu joogo. Lacag kaama rabo turjumaanka.

11. Da'dee bay carruurtu kaga tegi karaan guriga haddii aysa waalidkoodu isku fiicnayn?

Carruurtu waxa lo ogol yahay in ay guriga waalidkooda ka wareegaan markey da'doou gaarto 16. Si kastaba ha ahaatee dadka magan galyo doonayaasha ah ee aan sharciga la siin carruurtooda lacag kama heli doonaan iyo guriba hey'adda NASS. Hddii ay jirto dhibaato aad u hee rsareysa oo u dhaxeysa waalidka iyo carruurta, waxaa lagala xaajoon karaa shaqaalaha sooshalka o iyagu ku caawin kara.

12. Ninkeyga ayaa wuxuu iila dhaqmaa si xun, mararka qaar si aad ah ayuu iigu qeyliyaa, mararka qaarna arintu wey ka sii dartaa qeylada oo wuu dhaafsiiyaa, maxaan sameyn karaa?

Waxaa la helayaa hey'ado kaa caawin kara arimahan oo aad la xiriiri karto, haddii dhibaato noocan ahi ay ku heyso:

- Gargaar Dumarka (Scottish Women's Aid) ee Iskootishka waxaad ka heleysaa bogga internetka cinwaankiisu yahay www.scottishwomensaid.co.uk. Waxaad boggan ka heleysaa liis goobo aad la xiriri karto ee ku yaala waddankan Iskootland.
- Rape Crisis waxaad kala xirri kartaa telefoonka 0141 248 8848. Xaruumahooda oo dhan ee ku yala waddanka Iskootland waxaad ka heleysaa boggan internetka www.rapecrisisscotland.org.uk.
- Sooshalka ayaga waxaad habeen iyo maalinba kala xiriiri kartaa teleefanadooda aan waqtiga ku xirneyn. Eeg su'aasha 13aad.
- Waxaa jira hey'ado caawiya dumarka u dhahshey dadka laga tirada badan yahay ee dhibaato ay ku heysan karto guryahooda. Haddaad Glasgow ku nooshahay waxaad la xiriiri kartaa Hemat Gryffe Women's Aid teleefonka waa 0141 339 5196 ama waxaa ku booqan kartaa xafiiskooda ku yaala Flat 0/1 24 Willowbank Street Glasgow G3 6LZ inta u dhexeysa 9-ka subaxnimo ilaa 4-da galabnimo. Haddad Edinburgh ku nooshahay waxaad la xirriiri kartaa Shakhti Women's Aid teleefonka waa 0131 475 2399.
- Meridian xafiiskooda Glasgow waxay talo siiyaan dumarka ka soo jeeda dadka tirada yar (Ajnabiga) ku saabsan dhinaca dhibaatooyinka ninka iyo naagta ka dhex dhici kara talooyinkaas oo ay ku bixiyaan luqado kala duwan. Waxaad kula xiriiri kartaa telefoonka ah 0141 429 6034 si aad ballan uga sameysato. Edinburgh haddad ku nooshahay Saheliya ayaa aad ka heleysaa caawinaad haddii aad ka cabaneyso jirooyinka fekerka iyo maskaxda sida welwelka iyo niyad jabka, waxaad kala xiriirtaa telefoonka 0131 556 9302.
- Waxaa kale oo ku caawin kara Ethnic Minority Law Centre oo aad kala xiriiri karto telefoonka 0141 204 2888.

Fadlan xusuuso haddii arjigaaga magan galyo doonka uu yahay mid ku
Lifaaqan ninkaaga arjigiisa (mar is wada dhiibteen isagana uu mas'uul kaa yahay) oo aad sabareeyt sameysid waxay wax u dhaawici kartaa xaalkaaga joogitaan ee UK. La xiriir golaha qaxootiga iskootland (Scottish Refugee Council) telefoonka 0800 085 6087 si ay talo kuu siiyaan.

13. Deriskeyga ayaa waxay carruurtooda ugu qeyliyaan si joogta ah waxaanna had iyo jeer maqlaa muran ka soo diisa derbiga-ma qof baan kala hadlaa arintan?

-Haddii qof weyn uu ula macaamilayo carruur si daran waxaad ogeysiin kartaa shaqaalaha sooshaalka magacaagana lama sheegi doono. Nambarada waxaad ka heli kartaa buugga teleefonada koonsilka. Haddii saacadaha uu xiran yahay xafiiska ee aan aheyn inta u dhaxeysa maalmaha Isniinta-Jimcaha aad ku soo aaddo, waxaad kala xiriiri kartaa nambarada emergensiga sooshaalka xaafaddaada.

Aberdeen 01244 693939
Angus 01382 432270
Dumfries 0800 511505
Dundee 01382 436430
Edinburgh, Midlothian, East of Scotland 0800 731 6969
Falkirk 01786 470 5000

Fife 01592 415000
Glasgow, Inverclyde, Argyll & Bute, West of Scotland 0800 811505
Highlands 0845 769 7284
Moray 08457 565656
Orkney 01856 888000
Perth and Kinross 0845 3011120
Scottish Borders 01835 825080
Shetland Islands 01595 695611
Stirling, Clackmannanshire01786 470 5000
West Lothian 01506 777401
Western Isles 01851 701702

- Waxaad booqan kartaa saldhiga booliiska xaafadda ama waxaad garaaci kartaa nambarada ah 999 haddii arintu ay tahay arin aad u daran oo uu bahan in si deg deg ah wax looga qabto.

14. Ma booqan karaa reerkeyga oo ku nool waddanka dibaddiisa si xun baan u tabayaaye?

Refugees (Qaxootiga) Waxaad u dhoofi kartaa waddamada kale si aad u booqato qaraabadaada laakiin laguuma ogola inaad ku laabato waddankaaga aad markii hore ka timid maxaa yeeley waxaad waayi kartaa sharcigaaga qaxootinimo haddii aad falkaasi ku kacdo.Sharciyada kale ee joogitaankoodu cayiman yahay sida Indefinite Leave, Exceptional Leave, Humanitarian Protection and Discretionary Leave- Waxaad u dhoofi kartaa waddamo kale laakiin marka waa inaad istaambo saarataa baasaboorkaaga taasoo caddeyneysa sharcigaaga intaadan ka tegin UK si aad u tusto xafiiska socdaalka soo noqoshadaada inaad waddanka ogolaansho u heysatid soo geliddiisa. Waxaad qatar ugu jiri kartaa inaad weyso sharcigaaga haddii aad booqato waddankaagi aad markii hore ka soo jeeddey. Waxaa haboon inaad qareenkaaga kala hadashid arimahan intaadan safarka gelin ka hor.
Magangelyo doonayaasha (Asylum seekers)- Haddii aad tahay magan gelyo doone aan sharci heysan oo aad waddanka ka dhoofto, waxaa lagaagala codsashadaada magan gelyo doonnimada. Waxaa wanaagsan inaad talo weydiisato golaha qaxootiga iskootland (Scottish Refugee Council) amadadka sharci ahaan ku metela intaadan dhoofin ka hor. Golaha qaxootiga iskootland ayaa waxay kuu dalbi karaan dukumeenti aad safar ku gasho cinwaankooduna waa 5 Cadogan Square, Glasgow G2 7 PH, telefoon 0800 085 6087.

15. Reerkeyga ayaa waxay rabaan in ay ku noqdaan waddankii ay markii horeba ka Yimaadeen. Ma cid na caawin karta ayaa jirta?

Xafiiska caalamiga ah ee dhoofitaanka wuxuu hadda xafiis ku leeyahay Iskootlaan cinwaankuna waa 38 Queen Street Glasgow G1 3DX, 0141 548 8114/5, waxayna kaa caawin karaan dhinaca balamada. Hey'adda samafalka ee lagu magacaaboYMCA ayaa waxay leedahay qeyb la yiraahdo "Options" oo xarunteedu tahay Glasgow 33 Petershill Drive, G21 4QQ. Waxaad kula xiriiri kartaa telefoonka 0141 557 2355 si aad balan uga sameysato. Waxay kaa caawin doonaan talo siinta iyo kaalmo weydiisashada dhaqaale ahaan markaad laabaneyso iyo weliba dukumentigii ad ku dhoofi laheyd. Haadii hey'adda Caalamiga ah ee guuritaanka (IOM) waay kaa caawin karaan inay kuu tababaraan inaad dhisato shaqo (business) kolka aad laabato.

16. Waxaan rabaa inaan xiriir la yeesho reerkeyga an kaga soo tegey waddankeyg laakiin ma aqaan halka ay ku sugan yihiin-maxaan sameyn karaa?

Laanqeyta cas ee biritishka waxay leeyihiin qeyb baafineed ee fariimaha leysaga gudbiyo taasi waxay kaa caawin kartaa inaad hesho reerkaaga haddii aad la socon halka ay ku nool yihiin sababo dagaal ama mashaqooyin dabiici ah awgood. Wuxuu xafiiskooda ku yaalaa Ashfield House, 402 Sauciehall Street Glasgow G2 3JD, phone 0141 332 1607.

Caafimaadka

1. Da'dee bey carruurta ku aadi karaan dhaqtarka si iskood ah ayagoo aan la wehlin dhaqtarkase ma ila socodsiin doonaa xaaladdooda?

-Ilmahaaga waxay xaq u leeyihiin in ay iskood u tagaan dhaqtarka haddii da'doodu ay ka hooseyso 16. Haddii loo arko kuwo karti leh waxay qaadan karaan go'aankooda ah in ay ogolaadaan ama diidaan daawada. Waxayse arintu ka xiran tahay dhaqtarka.
- Waddankana Iskootland waxaa jira sharci ah inaan dhaqtarku kuu sheegi karan sababta ay gabadhaada ama uu wiilkaagaba uu u booqdey dhaqtarka ilaa ay iyaga idan siiyaan dhaqtarka.

2. Dhaqtarka ma ii sheegi doonaa daawada uu carruurteyda siiyo?

-Kuma qasbana dhaqtarku inuu mar walba kuu sheego dawada ay ilmahaagu qaataan. Iskootland gudaheeda ilmaha ka yar 16 sanno waxay ama ogolaan karaan ama diidi karaan daawo uu dhaqtarka u qorey ayadoo adiga waalidka ahna aan idan lagu weydiisan haddii uu dhaqtarka u arko in ilmaha ay yihiin dad fahamsan cawaaqibka ka imaan kara go'aankooda.
- Haddii dhaqtarka aysan la noqon in wiilkaaga/gabadhaada ay karti u leedahay in ay daawo aqbalaan ama ay tahayba arin deg deg ah (Emergency) oo ilmahna ay ku jiraan xaalad ay bad baadin u baahan yihiin marka qof mas'uuliyad waalidnimo ay saaran tahay waa loo baahan yahay inuu go'anada sameeyo.
- Hadii carruurtaadu ay yihiin 16 jir ama ka weyn waxaa loola dhaqmi doona sida dad qaangaar ah oo go'aanadooda shaqsi ahaan u gaari kara.

3. Carruurteyda dhaqtarka ma iska beddeli karaan iyagoon ogolaansho iga helin?

Arintani waxay ku xiran tahay da'da ay markaa jiraan carruurtaada iyo inuu dhaqtarka ama GP-ga uu yahay mid u aqbala iyaga sida bukaan. GP-yada loogama baahna in ay Ogolaadaan dadka ku qoran liiskooda oo dhan. Mararka qaarkood waxay uun ogolaadaan reer is wata oo keliya.

4. Ma codsan karaa dhaqtarad haween ah si ay ii baarto ama u baarto gabadheyda?

Inta badan goobaha caafimaadka waxaa laga helayaa dhaqtar rag ah iyo dhaqtarad dymar ah labadaba haddii aad dooneysana inaad aragto dhaqtarad waxaad arintaa dhameysan kartaa xiliga aad balanta sameysaneyso.

5. Ma jiraa qof ii turjumi doona wuxuu dhaqtarka ii sheegayo?

- Markaad dhaqtar iska diiwaan geliso waa inaad u sheegtaa inaad dooneyso t Turjumaan markaad dhaqtarka u baahan tahay.
- Balan kasta waxaad ka horeysiisaa inaad u sheegto qofka balamada sameeya inaad u sheegto in Turjumaan ad u baahan tahay.

6. Haddii dhaqtarkeyga uu xafiiskiisa xiran yahay ma cusbitaalka ayaan aadaa?

-GP-yada waxay diyaariyeen adeegyo ka baxsan saacadaha caadiga ah. Haddii aad telefoon kula xiriirto GP-gaaga oo uu xiran yahay waxaa macquul ah in telefoonkaaga uu u gudbo meell kale, meeshaas oo ku caawin kari doonta.

- Haddii aad xanuun iska dareento oo goobta dhaqtarkaaguna ay xiran tahay, waxaad telefoon u diri kartaa NHS 24 nambarka waa 08454 24 24 24. Halkaas waxaad ka heli doontaa warbixino iyo talooyin, waxaa kale oo aad ka heli doontaa adeegyo turjumid oo luqado kala duwan ah.

Hadaad aad u jirantahay ama shil aad gashay waa in aad tagtaa qaybta gargaar shilalka degdega ah ee cisbitaalka kugu dhow.

7. Maxaan sameyn karaa haddii xusuus aad u xun oo la soo dhaafey ay igu soo noq

Haddii xusuusahan qaar ay kaa joojinayaan inaad noloshaada caadiga ee maalmeedka aad gudato waa inaad u sheegtaa dhaqtarkaaga- dhaqtarka waxaa laga yaabaa in uu kuu diro qof la taliye ah ama qof tkhasus u leh. Waxaa jira adeeg dhinaca caafimaadka dhimirka ah(mental health service) ee loogu talo galay qaxootiga ee Glasgow ee lagu magacaabo Compass kuwaas oo kaa cawin kara inay talo kaa siiyaan telefoonkooda **0141 630 4985**.

Haddii laguu geystey jirdil,kufsasho, ama xumaan kaleba waxaa jirta hey'ad lagu magacaabo Medical Foundation for the Victims of Torture oo xafiiskooda uu ku yaalo qolka 27 Adelphi Centre 12 Commercial Road Glasgow G5 OPQ, **0141 420 3161**. Bogga aad ka heli doonto waa www.torturecare.org.uk. Hey'adda Ethnic Minority Law Centre waxay ku siin karaan talo telefokooda waa **0141 204 2888**.

Waaa inaad qareenkaaga u sheegtaa haddii ay jiraan waxayaabo xun xun ee kugu soo dhacay ee aad xusuus ahaan kugu soo laba kacleynaya.noqoneyso?

Shaqada

1. Goorma ayey carruurta aadi karaan shaqo iskuulka markey ka soo laabtaan?

Arintani waxay ku xiran tahay sharcigaaga-carruurta ay dhaleen dadka aan sharciga heysan ma sameyn karaan shaqo lacag lagu siinayo.

Da'da 10-12- Adiga uun bey kuu shaqeyn karaan ayagoo qabanaya shaqooyin fudud sida jardiino sameynta iyo beer ka shaqeynta.

Da'da 13 Waxay meelo geyn geyn karaan joornaalada, waxay
shaqooyin yar yar ka qaban karaan dukaamada, kafeeyada, xafiisyada, maqaayadaha, hoteelada, meelaha timaha lagu sameeyo.

Da'da 14 -15- Waxay qaban karaan shaqo walba oo fudud haddii aysan shaqadaasi aheyn mid ku jirta liiska shaqooyinka caruurta sida qaadista alaabta culculus, ka shaqeynta shaneemooyinka, jikooyinka, guryaha dadka waaweyn ama carruurta lagu hayo, meelaha dhismooyinka ay ka socdaan, iyo ganacsiga lagu sameeyo telefoonada.

Carruurta ka weyn 16 sanno ee ardeyda ah waxay shaqeyn karaan shaqo aan buuxin (part-time) laakiin waxay u baahan yihiin in ay helaan ogolaansho shaqo mudoo todobaad gudahood ah markey shaqada bilaabaan. Qofka wax shaqaaleeya waa inuu buuxiyaa foomka macalinka iskuulkana waa inuu saxiixaa. Waalidiintana waa inay saxiixaan foomka si ay u miijiyaam inay ogol yihiin in ilmahooda ay shaqeeyaan.

Waxaa jirta lacag deeq ah oo la siiyo ardada ka weyn 16 sanno oo sii wata waxbarashada haddii ay heystaan sharci ay waddanka ku sii joogaan. Shuruucda waa kuwo aan mararka qaarkood si toos ah horey looga fahmi Karin, waxaadse ka ogaan kartaa adigoo booqda bogga inernetka ee www.emascotland.com Waxaadna foom ka codsan kartaa iskuulka ama qeybaha kale ee qidmooyinka waxbarasho.

Sharciyada kala ah : Refugees, Exceptional Leave to Remain, Discretionary Leave to Remain, Indefinite Leave to Remain or Humanitarian protection-

Hadii aadan heysan Lambarka insuransiga waxaad u baahan tahay inaad ka doonato goobta shaqada laga doonto ee lagu magacaabo Job Centre Plus-ka ama Social Security Office-ka si mid aad u hesho oo laguu sameeyo. Haddii aad rabto inaad dalbato lacagta caawinnadda ah, waxaad wici kartaa goobta contact-ka loo yaqaano ee lambarkiisu yahay 0845 600 4270 si wareysi laguugu diyaariyo.

Magan gelyo doonayaasha aan sharciga heysan – Haddii aad tahay magan gelyo doonne aan sharci heysan sida caadada ah laguuma ogola inaad shaqesato sidaa darteedna uma baahnid inaad sameysato nambarkaas.

2. Waa maxay nidaamka loo maro arjiyada National Insurance-ka?

Waxaa la helayaa habab fara badan oo aad shaqo ku heli kartid.

- Waxaad ka doonan kartaa xarunta shaqooyinka (Job centre) xaafadda aad deggan tahay. Eeg www.jobcentreplus.gov.uk ama midka kugu dhow.
- Xafiiska lagu magacaabo Careers Service waxaad ka heli doontaa warbixino ku saabsan shaqooyin kala duwan. Bogga internetka www.careers-scotland.org.uk wuxuu ku siin doonnaa cinwaanka xafiiska xaafaddaada ama waxaad ka wacaneysaa nambarka 08458 502 502 ee Careers Scotland.
- Waxaad ka raadinkartaa shaqo warsideyaasha. Waddanka Iskootland waxaa laga helayaa warsideyaal kala duwan oo magaalo weliba ay leedahay kuwo u gaar ah tusaale ahaan : Abardeen- Press iyo Journal, Dundee Courier, Edinburgh- Scotsman, Galbeedka Iskootland- The Herald. Warsidaha Daily Record meelo badan ayaa laga helaa sida warsidaha Sun. Warsidyaasha aan lacagta aheyn laftigoodaa waxay leeyihiin qeybo ay ku xayeysiiyaan shaqooyinka.
- Internetka waad ka baaran kartaa. Bogagga aad ka baaran karto waxaa ka mid ah: www.S1jobs.com , www.jobcentre.plus.com iyo www.icscottishrecruitment.co.uk.
- Waxaa jira hey'ado dadka shaqaaleeya kuwaasoo dadka u diro shaqooyin ku meel gaar ah ama shaqo buuxdaba- Eeg Yellow Pages-ka.
- Shaqooyinka iskaa wax u qabsada lagu qabto (Voluntary Work) waxay waxtar kuugu leeyiihiin markaad dhiseyso nidaam howleed xaafadeed ee bulshada ku nool xaafadda ka dhexeyso. Waxaa jira xarumo loogu talogalay shaqooyinka noocaas ah Iskootland oo aad ka heli karto bogga www.volunteerscotland.org.uk/vc_contact_list.op-53k. Waxaa jirta xarun ku taala Glasgow ee cinwaankeedu yahay 146 Argyle Street meeshaas oo aad booqan karto ama aad bogga internetka ay ku leeyihiin ee ah www.volunteerglasgow.org/4u aad ka eegi karto ama waxaad ka wacaysa telefoonka **0141 226 3431**.
- Waxaad magacaaga ku dari karta liiska sugidda ee shaqada lagu magacaabo 'work shadowing' ee ku sabsan godob ahaan dhaqada aad taqaan ee mashruuca la magac baxey The Bridges Project at the Institute of Contemporary Scotland telefoonka waa **0141 554 5440**.
- Golaha Qaxootiga Iskootland (Scottish Refugee Council) waxay leeyihiin qeyb ay ugu magac daraan 'drop in' maalmaha Arbacada ah inta u dhexeysa 10 subaxnimo-12.30 duhurnimo ayuu furan yahay xafiiskooda waxayna talo kaa siinayaan arimaha shaqada cinwaankoodu waa 5 Cadogan Square.

Hey'adda Ethnic Minority Enterprise Centre way ku caawin karaan kala xiriir **0141 221 4044**.

3. Maxay tahay habka ugu wanaagsan ee aan shaqo u raadin karo haddii aan helo sharciga aan waddanka ku joogi lahaa?

Lacagta/Guryeynta

1. Waxaan heley sharci aan ku dego UK muddo aan la cayimin amaba cayiman. Ma inaan meesha aan haddeer degganahay ka guuraa?

- Haddii NASS ay kuu soo beddesho Glasgow oo dabdeedna lagu siiyo sharciga cayiman ama midka aan cayimaneynba waa in laguu ogolaaaa inaad sii deggenaanto halkaaga. Haddii ay taasi ay suurto geli weydo waxaad la tashi la sameysaa hey'adaha hoos ku qoran. Glasgow Asylum Seeker Support Project (0141 222 7300) ayaa waxay kaa caawin doonaan inaad saxiixido heshiis ku meel gaar ah si aad u hesho xuquuq lacagta caawinnaadana aad u dalbato.
- Haddii aad deggan tahay guri (flat) ah ama guryaha sida gaarka ah loo leeyahay ama meel aan qeyb ahaan ka tirsaneyn goobaha ay NASS dadka u bedesho waxaad la tiigsataa arintaas hey'adaha hoos ku qoran mid ka mid ah.
- Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square, Glasgow G2 7PH , telefon 0800 085 6087.
- Shelter telefon 0808 800 4444 ama www.scotland.shelter.org.uk.

2. Guriga ayaa cirriiri nagu ah, ma heli karnaa mid ka weyn midka hadda aan ku jirno?
Magan gelyo doon aan sharci heysan (Asylum seekers)- Sida ay qabaan shuruucd NASS, waxaa la idin siin karaa guri ka weyn midka aad ku jrto haddeer haddii uu buux dhaafsisan yahay. Haddii la waayo guryo waaweyn oo diyaar ah waxaa lagu weydiisan karaa inaad sugo ilaa inta la helayo guryo waaweyn. Waxaad talo u doonan kartaa:

- Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square, Glasgow G2 7PH , phone 0800 085 6087.
- Positive Action in Housing oo cinwaankoodu yahay 98 West George Street, Glasgow, G2 1PJ teleefoonkana 0141 353 2220.
- Shelter telefoonka 0808 800 4444 ama www.scotland.shelter.org.uk.

Haddii aad heysato sharciyada waqtigoodu cayiman yahay ama kuwa kaleba ee kala ah: Refugees, Exceptional Leave to Remain, Discretionary Leave to Remain, Indefinite Leave to Remain or Humanitarian Protection-
- Wax fudud ma aha. Waxay ku xiran tahay inaad tahay deggane gurigaaga iyo liiska sugidda guryaha waaweyn sida uu usoo degdego ama u soo daaho. Waxaa haboon inaad la xiriirto qofka guryaha maamula waxaad kaloo la xiriiri kartaa mid ka mid ah hey'adaha aan kor ku soo xusney.
- Glasgow gudaheeda waxaa laga helayaa hey'ad lagu magacaabo Refugee Support Team oo laga dhex sameeyey xafiiska Glasgow City Council-ka kuwaas oo ku caawin kara cinwaankoodaa waa Twomax Building, 187 Old Rutherglen Road, Gorbals, telefoonka 0141 276 8245.

3. Waxaan rabaa inaan London dib ugu guuro. Koonsilka guri ma isiin doonaa?

Magan gelyo doon aan sharci heysan (Asylum seekers)- Haddii NASS ay kuu soo beddeshey Iskootlan oo sharcinna aad weli helin waa arin aan dhici karin in guri uu koonsilka ku siiyo London ama dhulka Ingirrisga meel ay ka ahaataba. Waxaan la tashan kartaa la taliyayaasha ka

shaqeeya Scottish Refugee Council-ka cinwaankuna yahay 5 Cadogan Square, Glasgow, phone 0800 085 6087.

Haddii aad heysato sharciyada waqtigoodu cayiman yahay ama kuwa kaleba ee kala ah: Refugees, Exceptional Leave to Remain, Discretionary Leave to Remain, Indefinite Leave to Remain or Humanitarian Protection-

- Haddii aad dooneyso inaad London u guurto xaq baad u leedahay. Si kastaba ha ahaatee arinta waxay noqon doontaa in aan laguu ogolaan doonin in laguu tixgeliyo guri koonsil ee ku yaala London ama dhulka Ingiriiska intiisa kaleba ama Wales.
- Haddii aad dalbaneyso guri koonsil ah waxaa macquul ah in laguu soo celiyo Iskootland hal habeen keliya ka dib haddii aad keeni weyso caddeymo ah inay London kuu joogaan qoyskaaga dad ka mid ah oo caawinaad kaaga baahan ama qof ka mid ah qoyskaaga uu ka shqeeyo meeshaas.

Waad la joogi kartaa asxaab marka hore kadibna waxaad dalban kartaa guri xaafadda aidgoo ah qof horeba u sii deggenaa xaafadda, marka waxaad galeysaa liiska sugidda, inkastoo ay dhici karto inaad la sii noolaato guri aad u buux dhaafiyeen dadka ku nool ilaa muddo.

4. Wiilkeyga ayaa wuxuu sameynaya arbushaad, wuxuuna I leeyahay waan ka tegayaa guriga. Konsilka guri ma siiyaa 17 jirada?

-Arintani waxaa saameyn ku leh hadba sida aad waddanka ku joogtid.
- Haddii qoyska uu heysto sharci joogid aan cayinneyn laakiinse aan aheyn qaxooti, wuxuu xaq u leeyahay inuu guri dalbado, laakiin waxaa jirta muddo in la sugo. Wuxuu ka dalbanayaa hey'adda Council or Housing Association.
Waxaa haboon inuu la tashi sameeyo ku saabsan inuu awoodo krada qolka ama guriga. Wuxuu la xiriiri karaa 0808 800 4444. Waxaa macquul ah inay ku xirnaan doonto xaaladda uu ku sugan yahay, sida tusaale inuu shaqeeyo ama inuu dhigto iskuul ama koleej.
- Haddiise aad u baahataan inaad dhibka idin dhexyaala keligiina xallisataan waxaa muhiim ah inaad u tagtaan shaqaale ka tirsan qolada sooshalka ama macalin dugsiba haddii uu wiilkaagu iskuul dhigto.

5. Mid ka mid ah caruurteyda ayaa wuxuu rabaa inuu qaato kaarka bangiyada lacagta lagagala baxo, da'dii ma gaarey?

Ilmaha wey ka heli karaan kaararka lacagta bankiyada qaar xitaa markey da'doodu tahay 11. Markaad furaneyso koonto bankiyeed sidaa caadada waa inaad bankiga tagtaa oo aad tustaa aqoonsigaaga oo uu sawir ku dhegan yahay, warqad aad lacag ku bixisey oo addeyneysa cinwaankaaga iyo inaad buuxiso foomka.

6. Haddii aan rabo inaan si rasmi ah ugu laabto waddankeyga lacag miyaa leysiinayaa?

Xafiiska caalamiga ah ee dhoofitaanka wuxuu hadda xafiis ku leeyahay Iskootlaan cinwaankuna waa 38 Queen Street Glasgow G1 3DX, 0141 548 8114/5, waxayna kaa caawin karaan dhinaca

balamada YMCA-da oo ah hey'ad samafal ayaa waxay leedahay qeyb lagu magacaabo Options oo cinwaankeedu yahay 33 Petershill Drive ee Glasgow oo kuugu caawin karta waraaqo aad ku dhoofto iyo duulimaadkaba haddii aad dooneyso inaad dalkaagi ku laabato. Waddankaaga haddii lagu magacaabo (IOM)-ta ay xafiis ku leedahay waxay kaa caawin karaan inaad abuurato shaqo (business) aad adiga leedahay.
Kulaabashada waddankaaga aad ku laabato waxay wax ka beddeli kartaa xaaladdaada sharci ee UK- arintaan waxaa wanaagsan inaad a tashi kala yeelato qareenkaaga ama hey'ad sharciyeed.

7. Haddii aan sharci ka helo UK maxaa caawinaad ah oo la iiga geysan karaa dhinaca alaabta la dhigo guriga?
Glasgow iyo agagaarkeeda waxaa la helaa alaab guryeed aan lacag aheyn oo aad ka heleyso mashruuca lagu magacaabo Ruhill Furniture Project oo furan saacadaha u dhexeeya 9.30-4.30 maalmaha Isniinta-Jimcaha telefoonkana waa 0141 945 2746. Waxaa loogu talo galey alaabtana qoysaska heysta sharciyada kala ah refugee status, Indefinite Leave to Remain, Exceptional or Discretionary Leave to Remain or Humanitarian Protection. Inta lagu siinayo waa in xaddidan laakiin waxay kaloo hayaan alaab guriyeed raqiis ah oo aad iibsan karto.
Waxaad ka dalban kartaa Job Centre Plus-ka lacag deeq ah oo lagu magacaabo Community Care grant. Foomka buuxintiisa waxaa kaa caawinaya.

- Shaqaalaha ka tirsan sooshaal qeybta xuquuqaha lacagta caawinta (Welfare).

- Xafiiska Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square Glasgow, telefoonka 0800 085 6087. Haddii laguu diido lacagta waxaad ka qaadan kartaa rafcaan (abbiil).Waxaad kaloo ka heli kartaa alaab guriyeed aan lacag aheyn hey'adda Positive Action in Housing, 5 Old Dumbarton Road, Glasgow.

Daryeelka Carruurta

1. Xaggee laga heli karaa adeegyada ilaalinta carruurta da'doodu ka hooseyso shan sano?

Adeegyada ilaalinta carruurta waxa laga heli karaa xarumaha soo socda:

- Nerseriyaasha maamulka degmada(konsilka)
- Fasalada Nerseriga ku yaal dugsiyada hoose
- Nerseriyaasha Gaarka ah (Briwaataha)
- Nerseriyaasha Kollejiyada
- Kooxaha ciyaarsiinta, barnaamiyo joogta ah ee ciyaarsiinta iyo siihaynta carruurta saacadaha ka bannaan waqtiga dugsiyada
- kooxaha ilmaha saan-qaadka iyo waalidiinta
- xarumaha booqashada kediska ee kaniisadaha degmada iyo jaaliyadda oo bixiya adeega sii haynta carruurta kuwaas waxa taageera wakaaladaha khaadiminta, adeego socod ah ee ilaalinta carruurta ama khaadimiinta(shaqaalaha iskaa wax u qabso).

2. Xaggee uga heli karaa waxbarasho carruurteyda da'doodu tahay 3-4 sano?
Waxa jira boog internetka ee Skotland oo dhan oo ku siiya wararka adeegyada ilaalinta carruurta ee ku yaal degmadaadi kaas oo ah www.childcarelink.gov.uk ama wac nambarka 08000 960 296.

Waalidiinta carruurtoodu ee da'doodu tahay seddex ilaa afar sano waxay xaq u leeyihiin in ay helaan lacag la'aan nafaska saacadaha gaaban ee laba saacadood iyo nus maalinkasta, shanta maalmood ee usbuuci. Nafasyadani waxa laga diyariyaa nerseriyaasha maamulka degamada, fasalada nerseriyaasha ku yaal dugsiyada hoose, nerseriyaasha gaarka ah ama nerseriyaasha kollejka.

3. Sidee uga heli karaa carruurteyda nafas nerseriyaasha degmada?

Qaxootiga(Sharciyeysan) – Waxad u dalban kartaa nerseriga degmada adigoo buuxiya form xafiiskooda. Meelaha khaarkooda waxa jiri kara liiska sugayaasha laakin maamulka degmada waxa waajib ku ah in ay ku siiyaan laba saacadood iyo nus maalin kasta, shanta maalmood ee toddobaadka. Waxad magacaaga ku dari kartaa liisas badan.

Magan geliya doonka –Tani way kal duubanaan kartaa xaafadaha – waxad ogaata konsilka degmadaada adigoo telefon u dira 08000 960296 si aad u heshid nambarka telefonka xafiiska quseeya degmadaadi.

Glasgow dhexdeeda **uma** dalban kartid meel. Waxa warqad toos ah kula xiriiri doona Mashruuca Taageerada Magangeliya Doonka Glasgow (GASSP) markii ay ilmuhu gaaran da'da ku habboon **haddii** boos la helo. Laga yaabo in nafaskani uu san ahayn mid degmada iyo in **aadan** heli doonin bas paaska.

4. Waa maxay nooca waxbarashada ay carruurteyda ka heli doonaan nerseriga?

Carruurta da'doodu tahay 3-5 waxay raaceyaan manhajka qaranka oo dhiirri geliya waxbarasho habka ciyaarsiinta. Carruurtu waxay baran doonaan akhriska iyo qoraalka isla markii ka qeyb galaya xirfado fir-fircooni ah sida rinjiyeynta naqshadaha.

5. Sidee u caawin karaa in ilmahaygu si wataan afkooda hooyo?
Nerseriyaasha qaarkooda waxa laga helaa buugag laba luqadood si aad ugu akhrin lahayd luqada hooyo. Weydii nerseriga hadddii ay haystaan.

6. Miyaa la iga doonaya in aan bixiyo lacag baanboolayaasha nerseriga darraadooda?
Nerseriyaasha qaarkoda waxay ku weydiin karaan in aad bixiso tabarruc toddobaadki (badnaaba 50p). Khasab ma aha inaad bixiso laakin tabarrucu wuxu tabar gelinaya in la gato aalado dheraad ah ee waxbarashada carruurta.

7. Haddi aan helin nafas nerseriga degmada, ma jiraan adeegyo kale ee ilaalinta carruurta aan isticmaali karo?

Waxa jiri kara kooxo jaaliyadda degmada ama kaniisadaha oo leh xarumo lacag la'aan ah ee la booqdo ee leh adeega sii haynta carruurta ama kooxaha hoyooyinka iyo ilmaha saan-qaadka. Liiskoodi waxad ka heli kartaa boogga internetka www.scottishrefugeecouncil.org.uk/directory haddii aad riixdid fallaarta dejinta liiska.

Waxa kalo jiraan kooxo ciyaarsiinta carruurta, ilaaliyaasha carruurta iyo ururrada dugsiyadaha. Telefon u dir Childcare Link 08000 96 02 96 ama riix boogga internetka www.childcarelink.gov.uk .

8. Waxan dooneyaa in aan afka Ingiriiska ka barto kollej – Miyey igu deeqi doonaan nafas nerseri carruurteyda?
Kollejiyada qaarkooda way kaa bixin doonaan kharashka nerseriga marka aad wax baraneyso. Kaalmadani waxay ku ekaan doonta maalmaha aad xaadirineyso fasalada. Haddii aan jirin meel nerseriga kollejka, wuxuu kollejku kaa bixin doonaa kharashka nerseriga maamulka degmadaadi ama nerseriga gaarka ah ama qof diiwangashan ee ilmo ilaaliye ah. Waxad kalo heli kartaa bas bilaash ah. Marka aad is diiwaan gelineyso koors kollejka waxad weydiin kartaa form aad buuxiso oo aad ku ogeysiineyso in aad u baahan tahay deeqa nerseriga. Deeqa nerseriga ee lacag la'aanta waxa loo siiya korsooyinka aasaasiga ah oo keliye- lama siiyo koorsooyinka HNC ama HND.

9. Ma haysto waqtii aan isla markii ilmaha u geeyo nerseri iyo aniga oo kollejka aan aado-maxaan sameeya?

• Waxad nerserigaaaga weydiin kartaa in ay kuu qoraan warqad u caddeysa kollejka in aad ku daahi doonto xaadiriinta iyo in dhaqso lugu fasaxo si aad carruurta uga gaari lahayd.

• Nerseriyaasha qaarkooda waxay bixiyaan khidmad loo yaqaan "wrap around", oo aroorta hore loo kallaho ayna galabta sii wadaan saacadaha fasalada ka dib si ay carruurtaada sii joogi karaan illaa iyo inta aad adiga diyaar u tahay in aad kaxaysato. Hase yeeshe, tani waxay

dooneysa kharash dheeraad ah. Waxad weydiin kartaa kollejka in ay diyaar u yihiin in ay bixiyaan kharashkani.

10. Qof miya na caawin karaa haddii annaga, ama carruurteyna, aynu dareemeyno murug badan oo niyad jebsi ah?

• Haddii aad dareemeyso xaalad murug badan, booqde caafimaadka ama u-adeege bulsho wuxu ku dadaalaya in u ku diyaariyo meel ilaalinta ilmaha.

• haddii carruurtaada shan sano ka yar ay hayso dabeecad xumo, shaqaale caafimaadka ayaa booqan doona qoyskaaga iyo wuxuu kula talineya habka loo fiicneyn lahaa akhlaaqda carruurtaada. Haddii taasi ay wax tari weydo, adeegyo dhakhtarada cilmi-nafsiga ayaa ku caawin karaa.

• Hay'ad magaceedu ah Homestart ayaa Glasgow ka bixisa adeega 'saaxibeynta'. Khaadimiin ayaa ku siin kara kaalmo wax tar leh iyo taageero.

• Homestart wuxu ku yaala 76 Dunard Street ,Maryhill, 0141 948 0441 iyo
207 Shawbridge Street , Pollokshaws, 0141 585 6712.

11. Waxan helay shaqo– ma heli karaa kaalmo lacag aan ku bixiyo kharashka ilaalinta carruurteyda?
Waxa Glasgow ku yaal adeeg loo yaqaano 'Working for Families Fund' oo shaqaalaheeda ku caawin karaa haddi aad dooneysid in aad shaqeysatid – Fadlan wac 0141 287 9906 si aad u heshid tafaasiil.

12. Ma akhrin karaa war kasto khuseeya daryeelka carruurta ee afkeyga ku qoran?
Waxa jira warbixin ku saabsan daryeelka carruurta ee Glasgow oo loo yaqaano 'Future Scots' oo lugu heli karo afar luqadood ee sida hoose.

Waxbarashada-Hoose.

1. Haddii aan jecleysan iskuulka ay ilmaha ii dhigtaan ma ka beddelan karaa?

-Marka ugu horeysa waxaa wanaagsan inaad la hadasho iskuulka maxaa yeeley waxaa laga yaabaa inay arinta xalin karaan.

- Haddii aad weli ku faraxsaneyn waxaad codsi u dirsan kartaa iskuul kale adigoo la hadlaya xafiis madaxeedka waxbarashada iyo weliba waa inaad booqataa iskuulka aad dooneyso in caarruurta laguugu beddelo, waxaad horey u sii qaadataa waraaqaha dhalashada caruurta iyo wax caddeynaya cinwaankaaga. Caruurtaada waxaa uun boos la siin karaa marka uu meesha ka banaan yahay.

- Glasgow gudaheeda ilmahaaga waxaa lagaa yaabaa inaysan ka helin caawinaad iskuulkan cusub. Xaalka wuu ka duwanaan karaa midkan marka laga hadlayo meelaha kale ee ka tirsan Iskootland.

2. Caruurteydu ma ku qasban yihiin in ka xaadiraan casharada iyo xafladaha diimaha?

- Qof kasta waa inuu ka xaadiraa casharada diimaha ee iskuulka. Caruurtaada waaa la bari doono xaqiiqooyinka diimo kale oo fara badan,, laakiim lama bari doonno in ay diimahaasi kala fiican yihiin.

- Caruurtaada kuma qasbana in ay iska xaadiriyan xafladaha diimeed ama salaadaha iyo ducooyinka lagu qabanayo iskoolka.

Haddii ilmahaaga ay dhigtaan iskuul katoolik ah waxaa dhici karta in ay jiri karaan xisooyin diimeed lagu dukado laguna duceysto halkaasoo ay xisada iska dhex fadhin doonaan laakiin aan looga baahnaan doonin in ay ka qeyb qaataan.

3. Caruurteyda iskuulka ma baajin karaa markey jiraan xaflado diinteenna ah?

Glasgow gudaheeda ardada waxaa loo ogol yahay sanadkiiba seddex jeer in ay iskuulka ka maqnaadaan sababo diineed dartooda marka lagu daro Ciidda Masiixiga (Christmas) iyo Easter haddii aad qoraal ahaan ugu soo gudbiso iskuulka. Si kastaba ha ahaatee waxaa loo diiwaan gelin doonaa maqnaasho ahaan. Qeybaha kale ee Iskootland wey ka duwanaan karaan.

4. Caruurteyda ma ku qasban yihiin in ay ka xaadiraan xisooyin looga sheekeeyo isutagga labka iyo dhedigga?

Xaq baad u leedahay in carruurtaada lagaga baajiyo xisooyinkaas noocaas ah. Si kastaba ha ahaatee kama baajin kartid caruurtada xisooyinka Sayniska ama xisooyinka lagu magacaabo Personal and Social Education classes oo ay ku jiri karaan in yar waxbarasho dhinaca isu tagga ah qeyb ahaanna ka mid ah koorsada.

5. Macalimiinta ma kala hadli karaa sida ay caruurteyda ku yihiin iskuulka?
-Waxaad la hadli kartaa macallinka lakiin laguuma ogola inaad iska soo gasho fasalka maalmaha caadiga ah ee iskuulka?

- Waxaad sameysan kartaa ballan si aad ula kulanto madaxa iskuulka waqti walba oo aad u bahato.

- Waxaa kaloo jira waqtiyo loogu talo galey inay waaliddiinta iskuulka yimaadaan, caada ahaan waa sanadkiiba laba jeer, waqtiyadaas waxaad si qoto dheer ula sheekeysan kartaa macallimiinta carruurtaada su'aalo badan baad weydiin kartaa.

6. Haddii wiilkeyga/gabadheyda ardey kale ay handadayaan maxaan sameeyaa?
1. Warbixin dheeraad ah ka hel wiilkaaga/gabadhaada.
2. Waxaad la xiriiri kartaa madaxa iskuulka ama macalinka fasalka oo aad kala xaajoon kartaa arintaas.
3. Iskuulka waa inuu lahaada sharci ka dhan ah handadaadda carruurta handadaad carruurta kale sharcigaas oo ah mid aad indhahaaga ku arki karto. Waxaa jira bog internet ee iskootland looga soo horjeedo handaddadda oo ah www.antibullying.net wuxuu lee yahay qeyb waaliddiinta loogu talo galey.
4. Haddii ilmaha uu magac kuu sheego oo marqaatina la helo oo sheegi kara waxa dhacey, ardeyda ka danbeysa waa la wareysan doonaa.
5. Iskuulku wuxuu ku dhiiri gelin doonaa ilmahaaga in ay dhex joogaan saaxiibadooda si ay bad baad u dareemaan. Iskuulka waxay kaloo u sameyn karaan saaxiib kaasoo ugu deeqi doona saaxiibtinimo iyo caawinaadba. Haddii xaalku yahay mid qatar waxaa laga yaabaa in ay booliiska soo galaan.

Waxbarashada – Dugsiga sare

1. Sanadkee bey caruurtu dhameyn karaan iskuulka?
Hadii ilmahaaga ay 16 jirsadaan inteysan dhamaan bisha September waa ay ka tegi karaan iskuulka dhamaadka xilliga kulleylaha (summer-ka) sida Juun. Haddii ilmahaagu ay 16 jirsadaan ka hor dhamaadka Janaayo waa ay ka tegi karaan iskuulka xilliga Ciidda masiixiga (Christmas-ka).

2. Ilamaha ma e beddeli karaa iskuulka?
- Marka ugu horeysa waxaa wanaagsan inaad la hadasho iskuulka maxaa yeeley waxaa laga yaabaa inay arinta xalin karaan.
- Haddii aad weli ku faraxsaneyn waxaad codsi u dirsan kartaa iskuul kale adigoo la hadlaya xafiis madaxeedka waxbarashada iyo weliba waa inaad booqataa iskuulka aad dooneyso in caarruurta laguugu beddelo, waxaad horey u sii qaadataa waraaqaha dhalashada caruurta iyo wax caddeynaya cinwaankaaga. Caruurtaada waxaa uun boos la siin karaa marka uu meesha ka banaan yahay.
- Glasgow gudaheeda ilmahaaga waxaa lagaa yaabaa inaysan ka helin caawinaad iskuulkan cusub haddii ilmaha aysan laheyn sharci. Xaalka wuu ka duwanaan karaa midkan marka laga hadlayo meelaha kale ee ka tirsan Iskootland.

3. Haddii wiilkeyga/gabadheyda ardey kale ay handadayaan maxaan sameeyaa?
1. Warbixin dheeraad ah ka su'aal wiilkaaga/gabadhaada.
2. Waxaad la xiriiri kartaa madaxa iskuulka ama macalinka fasalka oo aad kala xaajoon kartaa arintaas.
3. Iskuulka waa inuu lahaada sharci ka dhan ah handadaadda carruurta handadaan carruurka kale sharcigaas oo ah mid aad indhahaaga ku arki karto. Waxaa jira bog internet ee iskootland looga soo horjeedo handaddadda oo ah www.antibullying.net wuxuu lee yahay qeyb waaliddiinta loogu talo galey.
4. Haddii ilmaha uu magac kuu sheego oo marqaatina la helo oo sheegi kara waxa dhacey, ardeyda ka danbeysa waa la wareysan doonaaa.
5. Iskuulku wuxuu ku dhiiri gelin doonaa ilmahaaga in ay dhex joogaan saaxiibadooda si ay bad baad u dareemaan. Iskuulka waxay kaloo u sameyn karaan saaxiib kaasoo ugu deeqi doona saaxiibtinimo iyo caawinaadba.
6. Haddii xaalku yahay mid qatar ah waxaa laga yaabaa in ay booliiska arinta soo galaan.

4. Ilaa iyo intee jeer baan Macallimiinta kala hadli karaa sida ay caruurteyda ku yihiin iskuulka?
-Waxaad la soo diri katraa telefoon si aad balan uga sameysato macallimiinta ay quseyso booqashadaada si aad u ogaato xaalka caruurtaada.

- Dugsiga inta badan wuxuu soo diyaar doonaa gurigana u soo diri doonaa warbixino ku saabsan horumarka ilmahaaga dhanka waxbarasho.

- Waxaa kale oo jira laba fiid waalid oo aad imaan karko dugsiga macalamiinta ilmhaaga wax bara aad la sheekeysan doonto su'aalana weydiin doonto.

5. Caruurteyda ma ku qasban yihiin in ay ka xaadiraan xisooyin looga sheekeeyo isutagga labka iyo dhedigga?
Xaq baad u leedahay in carruurtaada lagaga baajiyo xisooyinkaas noocaas ah. Si kastaba ha ahaatee kama baajin kartid caruurtada xisooyinka Sayniska ama xisooyinka lagu magacaabo Personal and Social Education classes oo ay ku jiri karaan in yar waxbarasho dhinaca isu tagga ah qeyb ahaanna ka mid ah koorsada.

6. Caruurteydu ma ku qasban yihiin in ka xaadiraan casharada iyo xafladaha diimaha?
- Qof kasta waa inuu ka xaadiraa casharada diimaha ee iskuulka. Caruurtaada waaa la bari doono xaqiiqooyinka diimo kale oo fara badan,, laakiim lama bari doonno in ay diimahaasi kala fiican yihiin.
- Caruurtaada kuma qasbana in ay iska xaadiriyan xafladaha diimeed ama salaadaha iyo ducooyinka lagu qabanayo iskoolka.
- Haddii ilmahaaga ay dhigtaan iskuul katoolik ah waxaa dhici karta in ay jiri karaan xisooyin diimeed lagu dukado laguna duceysto halkaasoo ay xisada iska dhex fadhin doonaan laakiin aan looga baahnaan doonin in ay ka qeyb qaataan.

7. Caruurteyda iskuulka ma baajin karaan markey jiraan xaflado diinteenna ah, iskuulka ma leeyahay goob ay ku cibaadeysan karaan?
-Glasgow gudaheeda ardada waxaa loo ogol yahay sanadkiiba seddex jeer in ay iskuulka ka maqnaadaan sababo diineed dartooda marka lagu daro Ciidda Masiixiga (Christmas) iyo Easter haddii aad qoraal ahaan ugu soo gudbiso iskuulka. Si kastaba ha ahaatee waxaa loo diiwaan gelin doonaa maqnaasho ahaan. Qeybaha kale ee Iskootland wey ka duwanaan karaan.
- Dugsiga waxaa ugu talo geli karaan qol gaar ah cibaadeysiga, gaar ahaan waqtiga ay jirto ciid diineed, laakiin arintan waxay ku xirnaan kartaa inta qof ee diimo kala duwan heysta ee dugsiga dhigata. Waxaa la weydiisan karaa macalinka inuu kaa caawiyo arintaasi ma waxaad warqad u soo qori kartaa iskuulka.

8. Cid aan weydiin karo ma jirtaa shaqooyinka ay qaban karaan gabadheyda ama wiilkeyga?

Xafiiska lagu magacaabo Careers Service ayaa wuxuu ku siinayaa warbixino ku saabsan shqooyin kala duwan. www.careers-scotland.org.uk ayaad ka ogaaneysaa xafiiska kuugu dhow ee iskootland adigoo ku qoraya koodka boostada xaafaddaada ama ka wacaya nambarka 0845 502 502.

Waxbarasho- Iskuulka ka dib

1. Qofkee baa u gubi kara kulliyad (College) ama jaamacad?
Waxaad aadi kartaa jaamacad haddii aad dalbatey shuruudaha(qualifications) waxbarasho ee lagaaga baahan yahay si aad koorsada u barato aad buuxisey. Ardada iyaga oo da' weyn dalbada jaamacadda iyagu waxaa ay booskaas ku buuxsan karaan qibradda shaqo ee ay leeyihiin.

2. Haddii aan heysan shuruudaha waxbarasho ee aan ku gali lahaa jaamacadda maxaan sameeyaa?
Nidaamka waxbarasho ee Iskootland waxaa loo sameeyey hab ogolaaneysa ka gudbid koorso iyadoo loo sii gudbaya koorso kale. Koorsooyinka lagu kala magacaabo Higher National Certificate, Higher National Diploma, Access course waxay kaa caain karaan inaad jaamacad hesho. Waxaa wanaagsan inaad iska ogaato koorsda aad ddoneysid inaad barato.

3. Sidee baan ku ogan karaa koorsada igu haboon inaan barto si shaqada aan rabo aan u helo?
Bogga Careers Scotland www.careers-scotland.org.uk ayaad ka heleysaa warbixintaas ama kala xiriir telefoonka 0845 502 502. Waxaad kaloo booqan kartaa xafiiskooda si aad ula kulanto shaqaalaha qof ka mid ah oo wax kaaga sheegi kara.

4. Ma inaan lacag ku bixiyaa koorsooyinka waqtiga buuxa aan dhigto ee kulliyaddaha ama jaamacadaha?
Arinta wey adag tahay in si fudud loo fahmo, idaa daraadeed caawinaad weydiiso ku saabsan kiiskaaga shaqsiyadeed adigoo ka doonanaya hey'adda lagu magacaabo Careers Scotland ee www.careers-scotland.org.uk

Inta heysata sharciyada-Refugees and Indefinite Leave to Remain- Waxaa lacagta kaa bixin doona xafiiska lagu magacaabo Scottish Funding Council marka aad baraneyso koorsoyinka loogu yeero 'non advanced', haddii aad baraneyso koorsooyinka HNC, HND kala xiriir www.saas.gov.uk mise digirii heerkooda waxaa lacagta kaa bixinaya xafiiska Student Awards Agency for Scotland. Koorsada markii ay dhamaato ardada qaar ayaa waxaa waxay celin doonaan lacag dhan £2000, waxaa lagu magacaabaa Scottish Graduate Endowment.

Haddaad heysato sharciyada Exceptional Leave to Remain and Humanitarian Protection- Waxaa laga yaabaa inaad bixiso lacag waddanka haddii aad waddanka degganeyd muddo ka yar 3 sannadood, laakiin intaa wax ka badan haddaad degganeyd waxaa laga yaabaa in lagu aawiyo ee talo doono. Jaamacadaha qaar baa laga yaba inaay bal eegaan codsigaada mar haddii sharci ahaan uu xaalkaaga is beddelo intey koorsada kuu socoto.

Magangalyo doone aan sharci helin- Waxaad bixineysaa lacagtii ay bixin lahaayeen arada dibadaha jaamacadda uga yimaada, wax caawinaad ah ma heleysid ama deymaha ardada la siiyo. Haddii sharci ahaan joogitaankaagu is beddelo (oo aad sharci hesho) waa laga yaabaa in lagu caawiyo ee talo doono.

5. koorsooyinkee baa lacag la'aan ah?

Waxaad ka baran kartaa koorsada af ingiriisiga dadka luqadaha kale ku hadla kulliyad ama xarumaha jaaliyadaha (community centres). Liis kuliyadaha ah ayaad ka heli kartaa - www.scottishrefugeecouncil.org.uk/Services/EduCollege.htm. Waxaa kale oo aad baran kartaa koorsooyinka sare ama kuwa aan sidaa u sii hormarsaneynba oo laakiin aan aheyn waqti buuxa (part time), koorsooyinkani waa lacag la'aan marba haddii saacadaha ay ka hooseeyaan 16 toddobaadkiiba. Si aad saacadaha isugu kabto waxaad sameyn kartaa in ka badan hal koorso oo waqti dhiman ah.

6. Wax ma baran karaa iyadoo aan ceyrtana iga istaagin?

Sharciyada Refugees, Exceptional Leave to Remain, Indefinite Leave to Remain and Humanitarian Protection iyo Discretionary Leave to Remain – Waxaad geli kartaa waxbarashada sare sida Highers-ka waxaad kale oo aad baran kartaa National Certificate, National Qualification, Access, Higher National Certificate iyo Higher National Diploma oo aad ka baran karto kulliyadaha waxbarashada sare saacado ku siman 16 toddobaadkiiba adigoo certaada weli qaadanaya. Laakiin waa inaad u sheegtaa qolada Jobcentre-ka inaad waxbaraneyso shaqana aad doon dooneyso. Ardada qaar baa loo ogol yahay inay waxna bartaan ceyrtoodana qasla markaana ay helaan caawinada loo yaqaano Educational Maintenance Allowance illaa iyo 3 sanno kala xiriir www.emascotland.com . Iska soo hubso.

7. Aniga oo lacagta waxbarasho ee waqtiga buuxa la iga bixiyey haddana kaalmo kale oo lacageed ma helayaa?

Sharciyada Refugees and Indefinite Leave to Remain- Waxaad ka arji lacageed u qoran kartaa kulliyaddaada haddii aad baraneyso koorsooyinka lagu magacaabo (non advanced). Keliya ardada qaar baa loo ogol yahay in la siiyo lacagta la yiraahdo (bursary) markey baranayaan HNC, HND ama digirii. Waa inaad codsigaag si toos ah ugu dirtaa hey'adda Scottish Student Awards Agency si aad u ogaato in lacagtaas aad heli karto telefonka waa 0131 476 8212 ama bogga www.student-support-saas.gov.uk.

Lacag gaareysa ilaa 2,150 ayaa ay heli karaan arada ka timaadda qoysaska uu dhaqaalahooda hooseeyo. Waxaa kaloo jirta lacag deeq ah oo lagu magacaabo Mature Students Bursary Fund lacagtaas oo loogu talo galay in lagu caawiyo Ardada da'doodu ka weyn tahay 25 sanno. Arinta waxaa maamula kulliyadaha iyo jaamacadaha iyaga ayaa go'aamiya cidda u qalanta iyo cidda kaleba.

Sharciyada Exceptional Leave to Remain and Humanitarian Protection – iyo Discretionary Leave to Remain **Talo ka doono bogga** www.saas.gov.uk

Magan galyo doone aan shrci heysan- Wax caawinaad lacageed ee waxbarasho ma laha.

8. Deynta Ardeyda ma qaadan karaa?

Sharciyada Refugees and Indefinite Leave to Remain – Arjigaaga u diro Student Awards Agency for Scotland (SAAS) si aad deynta u codsato. Bogga waa www.student-support-

saas.gov.uk . Lacagta dib uma bixin doontid ilaa aad koorsada dhameysato oo aad bilowdo shaqo aad ka heli karto in ka badan £10'000 sannadkii.

Sharciyada Exceptional Leave to Remain and Humanitarian Protection –iyo Discretionary Leave to remain **talo ka doono bogga** www.saas.gov.uk

Magan galyo doone aan shrci heysan- Wax lacag ah ma heli kartid.

Qeybta Daryeelka Carruurta ee Qeybta Qoyska

1. Xaggee laga heli karaa adeegyada ilaalinta carruurta da'doodu ka hooseyso shan sano?
Adeegyada ilaalinta carruurta waxa laga heli karaa xarumaha soo socda:

- Nerseriyaasha maamulka degmada(konsilka)
- Fasalada Nerseriga ku yaal dugsiyada hoose
- Nerseriyaasha Gaarka ah (biriwaatiga)
- Nerseriyaasha Kollejiyada
- Kooxaha ciyaarsiinta, barnaamiyo joogta ah ee ciyaarsiinta iyo siihaynta carruurta saacadaha ka bannaan waqtiga dugsiyada
- kooxaha ilmaha saan-qaadka iyo waalidiinta
- xarumaha booqashada kediska ee kaniisadaha degmada iyo jaaliyadda oo bixiya adeega sii haynta carruurta kuwaas waxa taageera wakaaladaha khaadiminta, adeego socod ah ee ilaalinta carruurta ama khaadimiinta(shaqaalaha iskaa wax u qabso).

2. Xaggee uga heli karaa waxbarasho carruurteyda da'doodu tahay 3-4 sano?
Waxa jira boog internetka ee Skotland oo dhan oo ku siiya wararka adeegyada ilaalinta carruurta ee ku yaal degmadaadi kaas oo ah www.childcarelink.gov.uk ama wac nambarka 08000 960 296.

Waalidiinta carruurtoodu ee da'doodu tahay seddex ilaa afar sano waxay xaq u leeyihiin in ay helaan lacag la'aan nafaska saacadaha gaaban ee laba saacadood iyo nus maalinkasta, shanta maalmood ee usbuuci. Nafasyadani waxa laga diyariyaa nerseriyaasha maamulka degamada, fasalada nerseriyaasha ku yaal dugsiyada hoose, nerseriyaasha gaarka ah ama nerseriyaasha kollejka.

3. Sidee uga heli karaa carruurteyda nafas nerseriyaasha degmada?
Qaxootiga(Sharciyeysan) – Waxad u dalban kartaa nerseriga degmada adigoo buuxiya form xafiiskooda. Meelaha khaarkooda waxa jiri kara liiska sugayaasha laakin maamulka degmada waxa waajib ku ah in ay ku siiyaan laba saacadood iyo nus maalin kasta, shanta maalmood ee toddobaadka. Waxad magacaaga ku dari kartaa liisas badan.

Magan geliya doonka –Tani way kal duubanaan kartaa xaafadaha – waxad ogaata konsilka degmadaada adigoo telefon u dira 08000 960296 si aad u heshid nambarka telefonka xafiiska quseeya degmadaadi.
Glasgow dhexdeeda **uma** dalban kartid nafas.Waxa warqad toos ah kula xiriiri doona Mashruuca Taageerada Magangeliya Doonka Glasgow (GASSP) markii ay ilmuhu gaaran da'da ku habboon **haddii** nafas la helo. Laga yaabo in nafaskani uu san ahayn mid degmada iyo in **aadan** heli doonin bas paaska.

4. Waa maxay nooca waxbarashada ay carruurteyda ka heli doonaan nerseriga?
Carruurta da'doodu tahay 3-5 waxay raaceyaan manhajka qaranka oo dhiirri geliya waxbarasho habka ciyaarsiinta. Carruurtu waxay baran doonaan akhriska iyo qoraalka isla markii ka qeyb galaya xirfado fir-fircooni ah sida rinjiyeynta naqshadaha.

5. Sidee u caawin karaa in ilmahaygu si wataan afkooda hooyo?
Nerseriyaasha qaarkooda waxa laga helaa buugag laba luqadood si aad ugu akhrin lahayd luqada hooyo. Weydii nerseriga hadddii ay haystaan.

6.Miyaa la iga doonaya in aan bixiyo lacag waxyaaba caruurtaku ciyaarto nerseriga darraadooda?
Nerseriyaasha qaarkoda waxay ku weydiin karaan in aad bixiso tabarruc toddobaadki (badnaaba 50p). Khasab ma aha inaad bixiso laakin tabarrucu wuxu tabar gelinaya in la gato aalado dheraad ah ee waxbarashada carruurta.

7. Haddi aan helin nafas nerseriga degmada, ma jiraan adeegyo kale ee ilaalinta carruurta aan isticmaali karo?
Waxa jiri kara kooxo jaaliyadda degmada ama kaniisadaha oo leh xarumo lacag la'aan ah ee la booqdo ee leh adeega sii haynta carruurta ama kooxaha hoyooyinka iyo ilmaha saan-qaadka. Liiskoodi waxad ka heli kartaa boogga internetka www.scottishrefugeecouncil.org.uk/directory haddii aad riixdid fallaarta dejinta liiska.
Waxa kalo jiraan kooxo ciyaarsiinta carruurta, ilaaliyaasha carruurta iyo ururrada dugsiyadaha. Telefon u dir Childcare Link 08000 96 02 96 ama riix boogga internetka www.childcarelink.gov.uk.

8. Waxan dooneyaa in aan afka Ingiriiska ka barto kollej – Miyey igu deeqi doonaan nafas nerseri carruurteyda ?
Kollejiyada qaarkooda way kaa bixin doonaan kharashka nerseriga marka aad wax baraneyso. Kaalmadani waxay ku ekaan doonta maalmaha aad xaadirineyso fasalada. Haddii aan jirin nafas nerseriga kollejka, wuxuu kollejku kaa bixin doonaa kharashka nerseriga maamulka degmadaadi ama nerseriga gaarka ah ama qof diiwangashan ee ilmo ilaaliye ah. Waxad kalo heli kartaa bas pass bilaash ah. Marka aad is diiwaan gelineyso koors kollejka waxad weydiin kartaa form aad buuxiso oo aad ku ogeysiineyso in aad u baahan tahay deeqa nerseriga. Deeqa nerseriga ee lacag la'aanta waxa loo siiya korsooyinka aasaasiga ah oo keliye- lama siiyo koorsooyinka HNC ama HND.

9. Ma haysto waqtii aan isla markii ilmaha u geeyo nerseri iyo aniga oo kollejka aan aado- maxaan sameeya?
- Waxad nerserigaaaga weydiin kartaa in ay kuu qoraan warqad u caddeysa kollejka in aad ku daahi doonto xaadiriinta iyo in dhaqso lugu ruqseyo si aad carruurta uga gaari lahayd.
- Nerseriyaasha qaarkooda waxay bixiyaan khidmad loo yaqaan "wrap around", oo aroorta hore loo kallaho ayna galabta sii wadaan saacadaha fasalada ka dib si ay carruurtaada sii joogi karaan illaa iyo inta aad adiga diyaar u tahay in aad kaxaysato. Hase yeeshe, tani waxay dooneysa kharash dheeraad ah. Waxad weydiin kartaa kollejka in ay diyaar u yihiin in ay bixiyaan kharashkani.

10. Qof miya na caawin karaa haddii annaga, ama carruurteyna, aynu dareemeyno murug badan oo niyad jebsi ah ?
- Haddii aad dareemeyso xaalad murug badan, booqde caafimaadka ama u-adeege bulsho wuxu ku dadaalaya in u ku diyaariyo nafas ilaalinta ilmaha.

- haddii carruurtaada shan sano ka yar ay hayso dabeecad xumo, shaqaale caafimaadka ayaa booqan doona qoyskaaga iyo wuxuu kula talineya habka loo fiicneyn lahaa akhlaaqda carruurtaada. Haddii taasi ay wax tari weydo, adeegyo dhakhtarada cilmi-nafsiga ayaa ku caawin karaa.
- Hay'ad magaceedu ah Homestart ayaa Glasgow ka bixisa adeega 'saaxibeynta'. Khaadimiin ayaa ku siin kara kaalmo wax tar leh iyo taageero.
- Homestart wuxu ku yaala 76 Dunard Street,Maryhill, 0141 948 0441 iyo 207 Shawbridge Street, Pollokshaws, 0141 585 6712.

11. Waxan helay shaqo– ma heli karaa kaalmo lacag aan ku bixiyo kharashka ilaalinta carruurteyda?

Waxa Glasgow ku yaal adeeg loo yaqaano 'Working for Families Fund' oo shaqaalaheeda ku caawin karaa haddi aad dooneysid in aad shaqeysatid – Fadlan wac 0141 287 9906 si aad u heshid tafaasiil.

12. Ma akhrin karaa war kasto khuseeya daryeelka carruurta ee afkeyga ku qoran?

Waxa jira warbixin ku saabsan daryeelka carruurta ee Glasgow oo loo yaqaano 'Future Scots' oo lugu heli karo afar luqadood ee sida hoose

Magan Gelyo miyaa laguu diidey

1. Maxaan sameeyaa haddii qoyskeyga arjigooda magan gelyo doonka la diido?

Hadii diidmadii ugu horeysey ay tahay, waxaad mar walba awoodi doontaa inaad abbiil(rafcaan) ka qaadato, laakiin waxay tahay inaad si deg deg ah ugu dhaqaaqdo arintaasi. La xiriir qareenkaaga mise la taliyahaaga dhinaca haajiridda.

2. Maxaan sameeyaa haddii qoyskeyga arjigooda magan gelyo doonka la diido?

Kiisaska qaar, abbiilkaaga waad sii wadan kartaa. Abbilkaaga inaad sii wadato waxay uun suurto geli kartaa haddii xaakim dhanka haajiridda ah ay dhacdo inuu qalad dhanka sharciga ah uu galo, qareenkaaga ayaa talo kaa siin doona arintan.

3. Qareenkayga wuxuu igu wargeliyey in aysan jirin sabab kale oo ii ogolaaneysa inaan abbiil qaato aan kaga hor tago diidmada-maxaan sameyn karaa?

Mararka qaarkood qareen kale ayaa la heli karaa oo oggol inuu kuu diyaariyo 'arji lagu codsanayo dib u eegis ' kiiskaaga ah, laakiin arintani waa in si dhaqso ah loogu dhaqaaqaa. Kiisaska qaar waxaa u suurto gali karta inuu kuu gudbiyo arji magan galyo doon oo mid cusub ah oo sababo cusub la cuskinayo. Qoysaska qaar waxaa u suurto gashay inay gudbiyaan arji cusub-kuwaaso loo oggolaadey iney waddanka ku sii joogaan oggolaansho la yiraahdo 'leave to remain' ama oggolaansho joogitaan.

4. Iima harin abbiil dheeraad ah, laakiin ilama ah inaan waddankeyga ku noqon karo sababo nabad gelyo awgood – Maxay dowladda UK ku dhaqaaqi kartaa?

Taasi wey ku xiran tahay hadba xaaladda waddankaaga uu ku sugan yahay iyo arimo kale.
Waxaa dhici kara:
Haddii dowladda UK ay kugu raacdo inuu waddankaaga yahay meel aan nabad gelyo laheyn, ama aysan jirin waddo bed qabta ee lagu mariyo, waad sii joogi kartaa waddanka codsanna kartaa kaalmo illaa dowladda ay la ahaato in lagu celin karo.
Haddii dowladda ay rumeysan tahay in si nabad ah lagugu celin karo, laakiin adiga aysan kula aheyn, waa macquul inaad abbiil qaadato kana dooddo go'aankaasi. Abbiil baad ka qaadan kartaa dib u celinta.

Haddii dowladda ay rumeysan tahay in si nabad ah laguu celin karo, waxaa lagaa fili doonaa inaad la shaqeyn la timaaddo. Haddii aadan sidaa yeelin, kaalmada lagu siiyo ayaa lagaa joojin doonaa. Haddii ay taasi dhacdo, waa inaad la xiriirtaa Scottish Refugee Council oo laga helo 5 Cadogan Square, Glasgow kala xiriir 0800 085 6087 si deg deg ah iyo/ama xafiiska shaqaalaha bulshada ee xaafaddaada si dhaqaale ahaan laguu caawiyo.

Si qasab ah ayaa dhici karta in guriga lagaaga saaro ama lagaa qabto halka aad saxiixa u tagto ee Reporting Centre deetana lagu geeyo meelaha dadka lagu hayo ka hor inta aan qasab lagaaga wadin UK (waxaa loo yaqaan dib u celin)

5. Iima harin xuquuq kale ee abbiil, ilamana aha in waddankeygu uu yahay mid nabad ah laakiin Wassaradda Arimaha Gudaha waxay igu leedahay waa lagu celinayaa – Maxaan sameyn karaa?

Waxaa lagaa yaabaa inaad u baahnaato inaad bilowdo ololе aad ku sii joogto UK. Ula jeedka ololaha waa in laga dhaadhiciyo dowladda UK iney bedesho fekerka ku aaddan kiiskaaga. Ololaha wuxuu noqon karaa mid loo wada jeedo, kaasoo inta dad la ogeysiin karo la ogeysiinayo, mise mid qaas ah, ayadoo caawinaad laga helayo kooxo qaas ah oo la xaajoon kara siyaasiyiinta iyadoo aan loo wada jeedin. Meel fiican oo laga bilaabi karo waa inaad horta marka hore heshaa caawinaadda mudanaha baarlamaanka ee xaafaddaada.
Warbixinada ku saabsan ololeyaasha, ka eeg National Coalition of Anti Deportation Campaigns Website: http://www.ncadc.org.uk/campaigns/neverdoubt.html
Kooxaha xaafadaha deggan oo ku caawin kara waa:
The Unity Centre
30 Ibrox Street
Glasgow G51 1AQ
0141 427 7992
theunitycentre@btconnect.com
www.unitycentreglasgow.org

Glasgow Campaign to Welcome Refugees
Telephone: Margaret Woods oo lagala xiriiri karo 07870 286 632.
Email: glascamref@hotmail.com

6. Haddii qoyskeyga arjigigiisa la soo diido, caawinaadda NASS/IND ee magan gelyo doonka ma la iga joojin doonaa?

Haddii aad abbiil qaadaneyso, caawinada waxay u soconeysa sidii caadiga aheyd.
Haddii abbiilkaaga la soo diido-se, caawinada NASS/IND ee magan galyo doonka waa la joojin karaa, in kastoo arintani ay mararka qaarkood si deg deg ah aysan u dhacin.
Haddii cawinada lagaa joojiya, waa inaad la xiriirtaa Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square, Glasgow, 0800 085 6087 si aad cawino uga hesho iyo talo. Haddii ay kuu soo celin waayaan cawinada NASS, ama ay kaa soo daahdo-ba, waxaa wanaagsan inaad weydiiso bal haddey iyagu caawinaad deg deg ah kaaga sameyn karaan sanduuqooda qaaska ah ee Refugee Survival Trust or the Red Cross.
Kiisaska qaar, qaas ahaan marka uu carruur leeyahay qoyska, ama qaar ka mid ah qoyska ay yihiin naafo ama caawinad qaas ah shaqsiyaad u baahan, golaha xaafadda ayaa waxay bixin doonaan caawino dhaqaale ama nooc kaleba leh. La xiriir xafiiska shaqada bulshada ee xaafadda, ama weydiiso Scottish Refugee Council or Positive Action in Housing caawinaad.
Xafiisyada gargaarka ee xaafadaha, meelaha cibaadada (lagu cibaadeysto) ayaa laga yaabaa iney bixiyaan caawinaad deg deg ah. Cawinada waxay noqon kartaa nooc dhar ah, cunto ah ama

lacagba ah, mararka qaarkoodna meel si deg deg ah laguu dejiyo oo hoy ah ayaad heli kartaa. Scottish Refugee Council ama Positive Action in Housing ayaa dhici karta iney talo ku siiyaan, ama waxaad ka eegi kartaa website-ka www.destitution.net si aad uga hesho warbixin.
Haddii aad cawino ka weyso meelahan aan soo sheegney oo dhan, Positive Action in Housing ayaa laga yaabaa iney kaa caawiyaan lacagta ay ugu talo galeen dadka dhibaateysan.
Positive Action in Housing
6th Floor, 98 West George Street, Glasgow
0141 353 2220
email home@paih.org
www.paih.org

7. Haddii qoyskeyga arjigiisa magan gelyo ay ku guul dareystaan xuquuq abbiilna aan ii harin, gurigeyga ma inaan ka tagaa?

Arintani waxay ku xiran tahay haddii aad xaq u leedahay kaalmo sii socota, cidda kaa bixineysey hoygaaaga qarashkiisa, ama nooca hoyga aad deggan tahay. Waxaa dhici karta in guri kale lagu dejiyo, xitaa haddii kaalmo sii socota laguu oggol yahay. Kiisaska qaar waxaa xitaa dhici karta in magaalo cusub lagu dejiyo.
Haddii aadan xaq u laheyn kaalmo sii socota ee dhanka dowladda ah, tusaale ahaan haddii uusan qoyskaaga ka mid aheyn ruux ka yar 18 sanno, waa laga yaabaa in guriga lagaa saaro. Haddii kiiska uu yahay sidaasi waxaa laguu soo diri doonaa digniin ka socota Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo qolada hoyga ku dejiseyba, taasoo ay ku qoran tahay taariikhda aad ka tageyso guriga. Haddii aadan baneyn guriga, dowladdu waxay leedahay awoodo si qasab ah guriga lagaa saari karo, haddii aad is hortaagtana waxaa dhici karta in laguugu eedeeyo fal denbiyeed.
Haddii lagu soo gaarsiiyo digniin guriga ka bixitaan ah, waa muhiim inaad raadsato talo. Waxaad la xiriiri kartaa qareen (qareenkan wuxuu noqon karaa mid ka duwan qareenkaaga haajiridda), Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square, Glasgow kala xiriir 0800 085 6087, Shelterline kala xiriir 0808 800 4444, www.scotland.shelter.org.uk, ama Positive Action in Housing, 98 West George Street, Glasgow on 0141 353 2220 sida ugu dhaqsiyaha badan.

8. Haddii qoyskeyga arjigiisa magan gelyo uu guul dareystey xaqna aan u laheyn abbiil, ma waxaa nala geyn doonaa meesha dadka lagu hayo.

Arintani ka jawaabisteeda ma fududa, maxaa yeeley waxay ku xirnaan doontaa waxyaabo badan. Laakiin caadi ahaan qof walba oo magan galyo doon ah waa la xiri karaa waqti walba, ka hor ama ka dib diidmada intaba. Haddii arintani ay wel wel kugu heyso, waxaa jira wax badan oo aad sameyn karto:

- Qareenkaaga si joogta ah ula xiriir, iska hubi in aad si wanaagsan ula socoto dhamaan wixii ku soo siyaada kiiskaaga.
- Garo lamabarka teleefoonka qareenkaaga ee ka baxsan saacadaha shaqada.
- La socodsii qareenkaaga xaaladaaha caafimaad.
- Hubi bal in qareenkaaga uu la sii socdo wixii waddankaaga ku soo siyaado.
- Ha kuu diyaarsanaadeen dhamaan waraaqahaaga sharciyeed si aad u sii qaadato haddii lagu xiro.

- Nuqul (Koobi) ka heyso dhamaan lambarada si aad u sii qaadatid- Waxaa macquul ah in teleefonka moobaaylka aan laguu oggolaan gudaha.
- Waqti walba sii heyso warbixinadan kugu saabsan.
    - Magacaaga oo buuxa
    - Taariikhda dhalashadaada
    - Tixraaca wasaarada arimaha gudaha
    - Tixraaca wasaaradda arimaha gudaha ee halka aad ka soo gashey waddanka
    - Isla warbixinadaas oo kale ee qoyskaaga
    - Lambarka telefoonka ee:Qareenkaaga(uu ku jiro lambarka deg degga ah), dhaqtarkaaga (haddii ay jirto dhibaato caafimaad ee heysata qof qoyskaaga ka mid ah ama adigaba), ama asxaabtaada/kooxo ku caawiya/kooxo olole kula sameeya.

Waxaa kaloo la xiriiri kartaa xarunta Unity Centre ee Glasgow ee 30 Ibrox Street (ee u dhow Brand Street Reporting Centre). Waad booqan kartaa xarunta intaada soo saxiixin xafiiska Brand Street, adigoo ka tagayo warbixino kugu saabsan si hadhow laguula soo xiriiro haddii lagu xiro adiga oo saxiix u yimid. Waxaad kale oo aad la xiriiri kartaa Action in Housing, 98 West George St, Glasgow, 0141 353 2220 warbixino ku saabsan xirista iyo dib isu celinta. Waxay ku siin karaa meel iska isu caawi si wax u fahamto ah.

9. Haddii arjigeyga qaxootinimo la soo diido, ma heli karaa caawinaad lacageed ee aan dib ugu laabto waddankeyga?

Waxaa jiro laba hey'adood ee jooga Glasgow kuwaasoo dadka ka caawiya dib u noqoshada.
The International Organisation for Migration waxay xafiis ku leeyihiin Scotland cinwaanka ah 38 Queen Street, Glasgow G1 3DX, 0141 548 8111, 0141 548 8114/5. Caawinaad baad ka heli kartaa iyo talo- 'telefoon kula xiriir' si aad balan u sameysato.
YMCA (hey'ad gargaar) waxay leeyihiin qidmo lagu magacaabo Options ee xafiis ku leh Glasgow ee cinwaankoodu yahay 33 Petershill Drive, G21 4QQ. Waxaad balan ka sameysan kartaa lambarka ah 0141 557 6185 ama 0141 5576103. Waxay ku siin karaan talo iyo warbixino, waxay kaloo kaa caawin karaan ku noqoshada waddankaaga iyo helista waraaqo aad ku safarto, duulimaadka iyo cawino waddankaaga ah. Haddi wadankaaga uu leeyahay hey'adda caalamiga ah ee hijrada (IOM) iyaga ayaa kaa caawin kara tababaro ama si aad ganacsi u sameysato markaad ku laabato waddankaaga.
Ku noqoshada waddankaaga waxay wax ka beddeleysaa qaab sharciyeedkaaga-Arintani waa inaad kala xaajootaa hey'adda ama qofka ku metela sharci ahaan. Eeg : Qeybta Qoysaska-Qoys.

10. Waxaan ka wel welayaa waxa dhici doona, maxaan sameyn karaa?

Haddii adiga ama xubnaha qoyskaaga ay wel wel ka qabaan ka tegista waddanka , ka dhoofinta waddanka, ama xirista-ba, fadlan guji halkan.
Qeybta dadka da'da yar- Dareemaya murugo.